# OGOOW WAAJIBKAAGA

## MARKA AAD LA KALUNATID CIIDANKA SOOHDIMAHA DALKA AUSTRALIA (ABF)



Boolis **MA AHA**




Awood boolis **MA LAHA**



Waxay awoodaan **KALIYA** dhaqan gelinta sharciyada socdaalka

Hadii aadan fahhmin waxa ay ku leeyihiin **"interpreter and lawyer please" (fadlan turjibaan baan ubaahanahay ama garyaqaan)** . Waxaad kaloo codsan kartaa in turjimaanka lagaa badalo



नमस्ते здраво **Xin chào**
ሀሎ **Hola** 你好 مرحبًا
**Akkam** வணக்கம் **zdravo**



### Hadii ay ku joojiyaan ABF...

- **Weydii:** "What reason are you stopping me?" (waa maxay sabata aad ii joojisay?")
- Hadii ABF aysan heysanin sabab suurtagal ah, waxaad usheegtaa **"You don't have the right to do stop me for no reason (Xaq uma lahid in aad ii joojisid sabab la'aan)"**, kana sii soco.
- Hadii ay kugu dhahan waxaanu si weyn kagaa shakinay in aadan heysan warqada da kugalka (visa), **weydii "Waa maxay sabata aad iiga shakiseen?"**. Midab ama dhaqan kugu kaliya kuguma filna in aad iiga shakisid.
- Waxaa suurtagal ah in ay ku weydiyaan, magacaaga, warqada cadeynta, waraaqda dalkugalka ama dhalashada wadanka. **Kuma qasbanid** in aad uga jawaabtid, balse waa ay ku xirikaraan sikastaba.
- **Waad codsan kartaa** in aad aqoonsigaaga ama baasaboorkaaga ama warqada dalkugalka aahadhoo dambe tustid hadii aadan wadan marka lagu joojiyo.
- Kuma qasbanid in aad ka jawaabtid su'aalo kale oo aan lagaa codsan sida in aad warqada cadeynta dalkugalka ama aqoonsigaaga iyo waxa aad wadanka ku joogtid.



### Hadii ABF yimaado goobtaada shaqada...

- **Weydii** hadii ay ogolaansho u heystaan? ("Do you have a warrant?") Hadii aysan u haysan maya **ma'soo gali kartaan ku dheh.**
- Waxay raadinayaan dad aan heysan waraaqaha dalkugalka ah waxaa soo raaci kara boolis hadii ay baarayaan wax dambi ah.
- Hadii aysan kuu sheegin in ay wataan ogolaansho iyo in kale ay ABF **waa ay soo gali karaan hadii qof uu u ogolaado**. ABF xitaa waa ay soo jabin karaan si ay u baaraan goobta shaqada. Hadii saas tahay, **weydii in ay ku tusaan aqoonsigooda**
- **Waa in aad tustaa warqada dalkigalka ama baasaboorka** hadii lagu weydiyo.
- **Ma'u'isticmaali karaan dadka awood** ilaa mooye ay qof ku ukaxeynrabaan googbaha lagu xiro dadka soo galootiga ah. Hadii ay awood kuu isticmaalaan **waa in aad ku wargalisaa** qareenkaaga hadhoow.




### Hadii ay ku xiraan ABF..

... sabantuna ay tahay in ay ku moodeen in aadan udhalan wadanka ama aadan heysan dalkugal

**CODSO GARYAQAAN ISLA MARKAABA!**

ABF waa in ay kuu ogolaadan in aad wacan kartiid garyaqaan meel kuugar ah.

**Waxba ha saxiixin** ilaa lagu turjimo si wanaagsan waxaana heysataa talo sharci.



### Hadii ay warqad ama faarin kaaga timaado ABF ama waaxda Arimaha Gudaha dalka Australia...

**Ka doono talo sharci oo bilaash ah ha'adaha hoos ku xusan:**

**Asylum Seeker Resource Centre**
📞(03) 9274 9899
MON-TUE-THU-FRI
10am-12.30pm
hadii lagu xiro:
✉️ legal@asrc.org.au

**West Justice Legal Centre**
📞(03) 9749 7720
Website: westjustice.org.au

**Qoraalka laga soo xigtay @westjusticeclc westjustice.org.au**

**@arcuporg arcup.org**

# UDIYAAR GAROWGA IMAATINKA SIDA LAMA FILAANKA AH WAAXDA SOCDAALKA EE GOOBTAADA SHAQADA




**Qoraalka laga soo xigtay Black Rose Federation @blackrose_rosanegra**

## 1. Waa in aad leedahay xiriir dadka aad meel kawada shaqeysaan.



Inta aadan wax ka badalin kalsoonida aad kaga hor imankartid Hay'ada Socdaalka, waa in aad la leedahay xiriir wanaagsan dadka aad wada shaqeysaan. Sida ugu fudud ee aad ku bilaabi kartid waa in aad la'hadashid oo aad baratаa wax ku saabsan noloshooda.

Markaad isku soo dhawaataan, sameyso bar bulsho oo aad kuwada xiriirtaan xiliga aad shaqada banaanka ka joogtid. Arinkani waa mid muhiim ah maxaa yeelay, waxaad si fudud u wada xiriiri kartaan adigoon ka cabsiqabin in uu dusha idinka eegayo madaxa shaqaalaha. Wada sheekeysiga koox ahaaneed ee baraha bulshada, waxay kaloo iidin tahay waa meel aad isku caawin kartaan oo hadii ay dhacdo weerar idinkaga imaado Waxaada Socdaalka.

## 2: Ogoow Xuquuqdada



Baro waxa aad sharci ahaan xaq u leedahay iyo sida loola hadlo iyaga, waa Ciidamada Soohdimaha ama Boolis.  Waxaa kaloo muhiim ah in aad ogtid inta uu sharcigu kuu ogolyahay marka aad rabto in aad isticmaasho xaquuqdaada ka shaqaale magangalya doon ahaan. Ogow xaquuqdaas kuuma balan qaadeyso badqab. Isku day in aad fahanto nooca farsamo ee la'adeegsado marka Waaxda Socodaalku si lama filaan ah aad ula kulanto iyo habka loo badalo farsamadaas.

## 3: Sameyso qorshe




Marka aad kalsooni badan ku qabtid dadka aad wada shaqeysaan, waxa aad qorsheynkartaa in Waaxda Socdaalku ay si lama filaan ah ku imaan karto. Door ciyaareed samey: habkii lagu wajihilahaa ama loogu jawaabi laha koox ahaan, waa hab fiican oo aad kalsooni iyo isku duubni ku dhismi karto. Waa in aad qorshaha ku darsataa:

- Sidee aad ku hubinkarta kuna war galin karta kuwa kooxdada in Hay'ada Socdaalku weerar idinkaga imadoono
- Sidee aad u ilaalinkartaa Shaqaalaha kuwa ugu halista badan
- Sidee aad u ilaalineysaa meesha laga soo galo iyo Meesha laga baxo
- Sidee aad u wargalineysaa dadka lashaqeeyo bulshada
- Sidee baad ugu xiriirneysaa taageero sharci?
- Sida aad ula dhaqmeysid maamulka.
- Sida aad uga falcelin kartid Ciidanka Soohdimahaee xaafada.

## 4: Si weyn u fekar



Waxaa jira farqi udhexeeya in aad is aabaabushid si degdeg ah marka dhibku dhaco, iyo in aad udiyaar garowdid waxa mustaqbalka dambe, si adiga iyo shaqaalaha u mideysnaataan xiliyada adag. Is aabulku waxa uu u baahan yahay in shaqaalaha ay bartaan sida midba midka kale u qanciyo si naxariis leh oo aysan ku jirin cabsi. rajo la'aan iyo takoor. Markaa waxaan dajin karnaa olole waxa aanu ku guuleysan karnaa isbadal faa'iido nooleh dhamaanteen.

**Arc Up waxay raadineysaa in ay mideyso in dadka magangalya doonka ah ay ka dagaalamaan xadgudubyada iyo sharciyada burbursan ee habka dalkugalka. Barnaamishkeena xorta ah, Migrants Building Power (Dhis Awooda Magangalyadoonka), wuxuu gacan kaa siin karaa sidii aad ku heli lahayd waxbarasho oo aad ula xiriiri cartid dadka kale ee doonayao in la'abaabulo.**

**Nagala soo xiriir oo naga mid noqo: arcup.org/migrantpower**

**@arcuporg**
**arcup.org**